# Tirinta

## Shaxda Ikhtiyaarka

Ilmahaaga waxa aad u sheegtaa inuu doorto hal ama wax ka badan oo hawlaha hoose ah. Waxa aad samaysaa ikhtiyaar oo waxaad daba gashaa xirfadaha muhiimka ah ee garaadka iyo hormarka dareenka bulshada. **Ka dooro hawlaha soo socda si aad u ogaato waxa uu ilmahaagu ka garanayo tirinta.**

### Su'aalaha La Waydiinayo:

- Isticmaal hawlaha soo socda si aad u aragto inta shay ee ilmahaagu tirin karo isaga oo aan isticmaalin xidhmo. Imisa shay ayuu ilmahaagu si sax ah u tirin karaa?
- Marka aad alaab badan siiso, miyaad ilmahaagu ma garan karaa ka inta badan iyo ka inta yar leh?

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Tilmaamaha Qoyskaaga:** Waxa aad ka warantaan wax badan, wax yar, iyo wax isku mid ah oo alaabta iyo shaqooyinka maalin kasta.  Ku dhiiri geli caruurtaada inay ka waramaan inta isugayn ay yihiin, inta ka sii badan ee jirta, iyo inta ka yar shayada maalin kasta. | **Yaa Waxbadan/Waxyar Haysta?** Oggow shayada ay qaadi karto gacanta ilmuhu (dhagaxaan, badhano, qaybo yaryar). Mid kasta oo idinka mid ahi waxa uu qaadayaa cantoobo oo waxa aad uu ka hadlayaa cida haysataa in badan/yar. Tiriya shayada mid kastaa gacanta ku haysto. Caruurtu waxa ay sidoo kale isticmaali karaan labadooda gacmood. | **Maxaad Banaanka Ka Heleysaa?** Iskugu keen alaabta banaanka la tirin karo (dhagaxaan, qoryo, ullo) oo ilmahaagu haku barbarto tirinta shayada inta kolba dhinac ay tagayaan. | **Dadka/Xayawaanka Gurigaaga:** Isbarbar dhig noocyada dadka/xayawaanka ee gurigaaga (caruurta/dadka waawayn, bilaa aadan/xayawaan) oo waxa aad ka warantaa cida wax badan, wax yar haysata iyo isugayn inta ay isku yihiin. Tusaale ahaan: 3 bilaa aadan iyo 2 ay = 5 marka la isku geeyo. Waxaa badan bilaa aadanka oo waxaa yar ayda: |
| **Ka Caawi Guriga:** Marka aad miiska fadhiisato, ama wixii kale ee habdhismeed qoyska ah, ilmahaaga waxa aad ka caawisaa | **Lul oo Daadi:** Wax aad ku ridaa 5-10 shilin koob yar ama weel. Ilmuhu inta uu lulo koobka ha daadiyo shilimaanta. | **Tuurida Laadhuuda:** Laba jeer tuur laadhuuda: Ilmahaagu haka boodo, ama bood boodo dhawr jeer laba dhinac ee | **Ku Tuurista Koobka:** Waxa aad ku tuurtaa shayo yaryar sida badhanka ama kubad cudbi ah oo ku jira koob caag |

| | | | |
|---|---|---|---|
| inuu tiriyo shayada. Waxa aad waydiisaa su'aalaha sida: "Imisa ayaan u baahanahay?" "In inagu filan ma haynaa?" "Imisa dheeraad ah ayaan u baahanahay?" | Waxa aad waydiisaa oo aad uga jawaabtaa su'aalaha ku saabsan inta madax/dabo ee uu usoo baxay. Kee badan? Yar? Imisa ayuu mid kastaa yahay? Marka la isku daro imisa? | laadhuudaada. Waxa aad kala hadashaa inta mid ee laadhuusa kasta kasoo baxday iyo inta marka la isku wado ay yihiin. | ah. Tiri inta shay ee koobka ku dhaca iyo inta ku dhaca banaanka. Miyay in badan ku dhacday koobka ama banaanka? |